

KU SAABSAN KULLIYADA IYO KULLIYADA: FAA'IIDOOYINKA DHIGASHADA KULLIYADA

Shahaadada **kulliyada** waxay kaa caawin doontaa adiga **helitaanka shaqo sare oo mushar leh iyo in degdeg lagu shaqaaleeyo**. Helitaanka shahaadada kulliyada ama **shahaado** waxay noqon kartaa shayga ugu wanaagsan ee aad qaban karto mustaqbalka.

SABABTEE AYAAN U TEGAYAA KULLIYADA?

HEL SHAQO KA WANAAGSAN OO DEGDEG BADAN

Gobolka Washington waxa uu leeyahay dhaqaalaha 7aad ee ugu koboca badan Maraykanka Waxaa jiri doona **furitaanada 740,000 shaqo** gobolkan 5 sanadood ee soo socda (Boston Consulting Group & Washington Roundtable, 2016).

Sanadka 2020, **70% DHAMMAAN shaqooyinka** gobolka Washington waxay u baahan donaa ugu yaraan waxbarashadda kulliyada (Carnevale, Smith & Strohl, 2015).

99% shaqooyinka cusub inta u dhexaysa 2010 iyo 2016 waxay u tageen dadka leh wax ka badan waxbarashadda dugsiga sare (Carnevale, Jayasundera, & Gulish, 2016).

Xirfad yaqaanada dhalin yarada ah ee leh dibloomada dugsiga sare waa **3 wakhti ay dhici kartaa** inay noqdaan kuwa aan shaqo hayn marka la barbardhigo xirfadyaqaanada dhalinta yar ee sita **digriiga bekelooriyada** (Taylor, Fry & Oates, 2014).

WAY WANAAGSANTAHAY IN LA GARTO:

Waxa aad kulliyada ku barataa ayaa muhiim ah.

Digriiyada qaarkood aad ayaa loo raadiyaa oo waxay keenaan mihnado mushahar sareeya. Hadda, digriiyada sayniska, teknoolajiga, injineerinka, xisaabta (STEM), caafimaadka iyo ganacsig ku hogaaminaya gelitaanka ugu sareeya ee heerka mushaharka.

IN LA SHAQAYSTO LACAG BADAN

Waxaa jira gol daloolo, **baaxad leh oo u dhaxeeya musharka ah** oo u dhexaysa xirfad yaqaanada waxbartay iyo kuwa ka aqoonta yar (Taylor, Fry & Oates, 2014).

Dhalinta yar ee sidata **digriiga Koowaad ee Labada Sano** waxay shaqaystaan celceliska **\$5,000 oo dheeraad ah sanadkii** oo ay dheer yihiin diblooda dugsiga sare kuwa sida (Kena et al., 2016).

91% "mihnadaha sahaada" Gobolka Washington (shaqooyinka u baahan xirfado sare iyo mushahar \$60,000 ilaa \$100,000 sanadkii) waxaa buuxin doona shaqaalaha leh digriiga kulliyada ama kulliyad uun (Boston Consulting Group & Washington Roundtable, 2016).

CELCELISKA DAKHLIGA EE HEERKA WAXBARASHADDA

Ka yar
Dugsiga sare:
\$26,780

Ardayga dhammaystay
dugsiga sare:
\$37,336

Kulliyada qaarkeed ama digriiga
asooshiyaytka:
\$41,548

Digriiga bekelooriyada:
\$61,828

Digriiga sare (mastarta xirfadeed iyo digriiyada digtooraaga):
\$75,452

(Bureau of Labor Statistics, 2017)

OKTOOBAR: FASALKA 9 iyo 10